



Ref.War/003/2020

Taariikh: 23 Febraayo 2020

Farriin ku socota dadweynaha (Public Notice)

Waxaa waayadan dalka ku soo badanaya shirkado dadka lacago ka aruuriya, una sheega inay maalgelin ugu samaynayaan suuqa kala iibsiga sarrifka lacagaha qalaad (Foreign Exchange Trading Market). Shirkadahaasi waxay macaamiishooda u ballan qaadaan faa'iido badan oo gaareysa 70%.

Bankiga Dhexe wuxuu rumaysan yahay in uu ganacsiga noocan ahi khasaare badan usoo jiidu karo dadka maalgashada.

Ma jiraan shirkado Ruqsad ama Shati (License) ka haysta Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo ka ganacsada sarrifka lacagaha qalaad ee suuqyada caalamiga ah (online forex trading).

Sidaas awgeed, Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, isaga oo ka duulaya waajibaadkiisa shaqo ee la xiriira korjoogtaynta habmaaliyadeedka dalka, ilaalinta xasiloonida suuqa maaliyadda iyo dhowrida hantida mawaadiniinta Soomaaliyeed, wuxuu mar kale uga digayaa shacabka iyo ganacsatadaba inay ka feejignaadaan shirkadahaas sare ku xusan, hantidoodana aysan ku aaminin adeeg maaliyadeed oo aan ogolaansho looga haysan Bankiga Dhexe

==Dhammaad==